

UJAANQAADISTA DHANKA XIRFADAHA

macluumaadka ardayga



ASKELEET KOHTI
AMMATTIA

opiskelijan aineisto

1	HORDHAC Johdanto	2
2	WARBIXIN KOOBAN EE FINLAND Tietoja Suomesta	3
3	TAARIIKHDA GUUD EE FINLAND Suomen historiaa	4
4	WARBIXIN KU SAABSAN QAAB DHISMEEDKA WAXBARASHADA FINLAND Yleistietoja Suomen koulutusjärjestelmästä	8
5	WAXBARASHADA CARUURTA IYO DHALINYARADA Koulutus lapsille ja nuorille	8
6	WAXBARASHADA DADKA WAA WAYN Aikuiskoulutus	10
7	FURSADAHA WAXBARASHADA AJAANIBTA Maahanmuuttajien koulutusmahdollisuudet	11
8	LINKIYO LA XIRIIRA WAXBARASHADA AJAANIIBTA Linkit	13
	JAANTUS: QAAB DHISMEEDKA WAXBARASHADA FINLAND Kaavio: Suomen koulutusjärjestelmä	14
	EREYBIXIN Sanastoa	15-60

1 HORDHAC

Johdanto

Buugaan hagaha ah waa macluumaad-waxbarashadeed oo loogutalagalay dadka aajanibta ah ee qorshaynaysa inay waxbartaan, waxbarashadaas oo ay si wadajir ah u soo qabanqaabiyaan ururada ajaaniibta iyo xisbiga Vihreä Sivistys- ja Opintokeskus oo loo soo gaabsho ViSiO. Hagahan ayaa si kooban loogu sheegayaa taariikhada Finland, qaabdhismeedka manhajka iskuulaadka iyo xarumaha waxbarasho ee Finland. Hagaha dhamaadkiisa ayaa waxaad ka helaysaa ereybixin guud ahaaneed iyo qaar ku saabsan Computerka, Xisaabta, iyo Fisigiska. Ulajeedada hagahaan ayaa ah in qofka ajanabiga ah ee dalka ku cusub helo jidka waxbarashadiisa ku haboon si uu ula qabsado nololsha Finland

Buugan ama hagahan ayaa ka dhashay wada shaqayn ka dhaxaysay ViSiO iyo ururka Puntland Community ry. Waana qayb ka mid ah caawimaad ay hey'ada maamulka waxbarashadu ugu talagashay projektiga - Ujaanqaadista dhanka xirfadaha. Waxqabadkaan wuxuu kor u qaadayaa waxbarashada ururada, kuwaasoo ka caawinaya ardayda ajaaniibta inay usahlanaato sidey u galilahaayeen iskuulada Finland. ViSiO iyo Puntland Community ry ayaa horay usoo wada shaqeeyay. Sanadii 2005 ayay wada hirgaliyeen manhaj la xiriira waxbarashada aasaaska kombiyuutarka. Hada Puntland Community ry waxay dhigtaa koorsooyin la xiriira barashada kombiyuuterka si ay ardaydu ugalaan imtixaanka laysinka kombiyuuterka (atk-ajokortin).

Qorshaha – ujaanqaadista dhanka xirfadaha – waxaa lagu baranayaa, sidii ay qofka ajnabiga ah ay waxbarashadu ugu fududaanlahayd, iyo sida

uu xirfad uga samaysan lahaa Finland. Sidaa daraadeed waxaa la eegayaa qaab nololeedka bulshada finland iyo qaab dhismeedka manhajka waxbarsho ee Finland.

Dad badan oo Finland u soo guuray ayaa aqoon badan kala yimid dalalkoodii, dadkaasoo leh aqoon xirfadeed iyo mid kaleba. Hadaba hadii aanay aqoontaas ku garanayn luuqada Finishka waxaa laga yaabaa in aanay ka faa iidsaysan xirfadooda. Sidaa daraadeed ayaa buugan waxaa qeyb weyn ka ah ereybixino qofka ka saacideysa inuu luqada finishka ku fahmo wixii uu horey u garanayay. Qofku haduusan ereyada muhiimka ah ee xirfadiisa ku aqoon luqada finishka shaqadiisa horumar kama sameykaro.

Koorsooyinka kala duwan ee ay jaaliyaduhu qaban-qaabiyaan ayuu buugani ka caawinayaa ardayda inay ka eegtaan ereyada aanay garanayn micnahooda. Wixii aad koorsooyinkaas ka barato ayaa kaa kaafinkara wixii aad tusaale ahaan ka baranlahayd koorsooyinka isku diyaarinta iskuulaadka xirfadaha lagu barto. Koorsooyinka la qabanqaabiyo iyadoo la kaashanayo hagahan, ayaa ku bixikara afka Soomaaliga, ama afka Finisha ayadoo la eegayo aqoonta luuqadeed ee ardayga.

ViSiO waa hay'ad dowli oo waxbarashada dadka waawayn ah, taasoo sare uqaadaysa mabda' cagaarka ah. ViSiO waxay qayb ka tahay hay'adaha bixiya kobcinta waxbarashada furan, taasoo aaminsan in qof walbaaba qaabkuu rabo wax u barankaro. ViSiO waxay kaloo siisaa ajaaniibta fursad ay ku hormariyaan qaabka waxbarashadooda, hadii ay waafaqdo qiimaha mabda'a cagaaran ee aduunka.

ViSiO ayaa waxay u rajaynaysaa dhamaan isticmaalayaasha hagahaan farxad iyo guul kagaarid waxbarashadooda. Waxaynu

aaminsanahay buugan hagaha ah iyo cidii iyadoo kaashanaysa hagahaan koorsooyin ku qaban qaabisa, inay wax badan ka faa iidi doonaan ajaanibtu. Qorista buugan hagaha ah waxaa mahadiisa iska leh ururka Puntland Community ry oo waxqabad xoog leh ka gaystay iyo hay'ada maamulka waxbarashada (Opetushallitus) oo dhanka kharashka ka kaalmaysay.

Ville Ylikahri
Diyaariye

2 WARBIXIN KOOBAN EE FINLAND

Tietoja Suomesta

Baaxada dhulka

337,030 kilimiter laba jibaaran.

Bulshada

5, 236, 000, 67% waxay ku noolyihiin magaalooyinka iyo degmooyinka, 33% waxay ku noolyihiin tuulooyinka. Qiyaastii 1,400,000 baa ah caa'ilo. Dadka shaqeyda waxaa lagu qiyaasay 2,500,000 kuwaasoo 52% ay dumar yihiin.

Magaalooyinka waa wayn

Helsinki (555,000) iyo nawaaxigeeda sida, Espoo (215,000) iyo Vantaa (178,000) waxa isku yihiin 16% bulshada Finland oo dhan. Magaalooyinka kale ee waa-wayn waa Tampere (195,000), Turku (173,000) iyo Oulu (120,000).

Qiyaasta da'da nolasha

Dumarka waa 81, ragana waa 74.

Xeerarka usoo guurista

Sharciga midawga Yurub wuxuu xaq usiinayaa dadka wadamada Yurub u dhashay inay usoo guuri karaan Finland, laakiin Finland ma dhiirigelinayso in loo soo guuro maadaama loo baahnaanayo in baahida arimaha bulshada la haqabtiro. Dadka ajanibiga ee ku nool Finland waxaa lagu qiyaasay 108,000 kuwaasoo badankooda ah Raashiyani, Istooniyan iyo Iswidhish.

Cimilada

Jiilaal (Summer) diiran iyo Gu (Winter) aad u qabow badan. Helsinki nawaaxigeeda celceliska jawiga xiliga Jiilaalka sare waa 68 digrii feranhayd, xiliga Guga hoose waa 15 digrii feranhayd, meesha uu waqooyiga Finland ka gaaro -8 digrii feranhayd. Bartamaha xilig Jiilaalka, Helsinki waxay yeelataa 20 saacadood oo iftiinka maalinta ah sidoo kale bartamaha xiliga Guga, Helsinki waxay yeelataa 6 saacadood oo iftinka maalinta ah, meesha ay waqooyiga Finland xiliga Jiilaalka ka yeelato 50 maalmood oo iftiinka maalinta ah, xiliga Gugana ka yeelato 50 maalmood oo mugdiga habeenka ah.

Diinta

Masiixiga loo yaqaano Evangelical Lutheran (89% bulshada Finishka baa aaminsan); masiixiga loo yaqaano Orthodox (1%), masiixiga loo yaqaano Catholic (1%), masiixiga loo yaqaano Anglican (1%), iyo diimaha kale (8%). ST: Birgitta (Dhalatay 1303) taasoo ahaanjirtay qoraa hibo lahaa, siyaasad yaqaan, kaniisad nidaamiye, sidoo kale qof dumar ah oo aad uqiimo badan waqtigeedii, ayaa ah weli dambi dhaafaha Finland (iyo Iswidhanba).

Calaamadaha

Calanka Finland waa cadaan (Barafka matala) iyo calaamada korooska oo buluug (Haraha matala)

Heesta qaranka

Wadankeena (Maamme), waxaa qoray gabyaaga Johan Runeberg iyo muusikyaqaan Fredrik pacius, waxaana markii ugu horaysay la bandhigay sanadkii 1848.

Madaxwaynaha

Madaxwaynaha ayaa waxaa soo doorta shacabka lixdii sanaba mar, ugu badnaan laba jeer, madaxwaynaha hada talada hayaa waa Tarja Halonen oo markii hore lasoo doortay 2000 kadibna marlabaad 2006.

Baarlamaanka

Baarlamaanka Finland ayaa ka kooban sida sharcigu dhigayo 200 oo xubnood waana unicameral (single chamber) amah hal baarlamaan halka wadamada qaar sida Maraykanka ay laba baarlamaan leeyihiin mid sare iyo mid hoose, xubnaha Baarlamaanka ayaa shacabka Finishku soo doortaan 4-tii sanaba mar, 41% kamida xubnaha waa dumar. Xukuumada hada talada haysa ayaa ka kooban afar xisbi oo is kaashaday Suomen Keskusta Kesk 51, Kansallinen Kokoomus 50 Kok, Vihreät 15, Ruotsalainen kansanpuolue RKP 9, sidaa awgeed bay iskugayn xubnahoodu yihiin 125 oo u dhiganta 63% inay kontoroolaan awooda Baarlamaanka, raysal wasaaraha hada talada hayaa waa Mr. Matti Vanhanen.

Sharciga

Sharciga wadanku ku dhaqmo hada ayaa markii ugu horaysay la hirgashay sanadii 1919, waxaana lasameeyay sharcigii hagi lahaa dad isku dhaqaya nidaamka (Republican-ka) oo ah in ay wadanka hagaan xubno baarlamaan oo ay dadku soo dooranayaan iyo madaxwayne dadku soo dooranayaan. Baarlamaanka iyo Raysalwasaaraha ayaa ka masuula daqliga iyo arimaha gudaha wixii quseeya, halka Madaxwaynuhu ka masuul yahay wixii arimaha

dibada ku saabsan. Sharciga hada wadanka ka jira oo dib u qaabayn lagu sameeyay sanadkii 2000 ayaa yaraynaya awoodii madaxwaynaha ee arimaha dibada, taasoo ku waajib noqotay Madaxwaynaha inuu kala tashado wasiiradaha dawlada wixii arimaha dibada la xiriira intaanu go'aan qaadan.

3 TAARIIKHDA GUUD EE FINLAND

Suomen historiaa

TAARIIQDA HORE

Esihistoria

1800 dhalashadii nabi Ciise horteed, qabiilo Tunders layiraahdo oo aan badnayn oo dega waqooyig Raashiya ayaa soo dagay waqooyiga Finland ee Lapland loo yaqaan iyo qaybo bariga Finland ka mid ah.

500 oo sano Ciise horti dad Baltig ah oo ka yimid waqooyiga Yurub iyo wadamada Nordiga ayaa soo dagay koonfurta iyo galbeedka finland, qabiilada Uraliska ee Raashiya waxay dageen bariga Finland, aakhirikii waxay riixeen dadkii deegaanka deganaa ee loo yiqiin Saamiga oo lagu aruurshay markii danbe waqooyiga lapland ee Finland.

Dhamaan qaybahaani oo idil waxay ahaayeen ugaarsato waxayna si koox kooxo ah u daganaayeen darfaha laagaha si ay uga kaluumaystaan uguna noolaadaan kaluunkaas. Waxay u noolaayeen qaab qabiil qabiileed, waxayna caabudi jireen ilaahyo dabiiciya sida Dabka, Dhirta iyo wixii la halmaala.

XILIGII ISWIDHISHKA

Ruotsin vallan aika

Iswidhan baa diinta masiixiga keentay Finland markii ay dhistay kaniisada roman katoliga sanadii 1157, isla markaana la wareegtay talada Finland mudo kadib, taasoo ka dhigaysa wixii xiligaas laga bilaabo in Swidhan hayso talada finland mudo lagu qiyaaso 600 sano. Sanadii 1362 bay Finland ka mid noqotay gobalada Iswidhan, mana laga garan katin qaybaha kale ee Iswidhishka, dhaqanada bulshada Finishka iyo Iswidhishka ayaa isku mid ahaa marka laga reebo diinta iyo luqada. Sanadii 1580 ayaa boqorkii Iswidhan ee King John III ugu magacdaray Finland Grand Duchy ee Swidhan, wuxuuna isaga isku magacaabay inuu yahay Grand Duke ee Finland iyo Kareliya.

Qarniyadii 15-naad iyo 14-naad dadka daga bariga Finland ayaa ahaa dad xoolodhaqata ah waayo dhulkaas oo aan beeraha ku haboonayn awgeed, halka dadka Koonfurta daga ay ahaayeen beeralay waxayna camireen magaalooyinka Turku iyo Viipuri waxaana ka muuqday aqoon xirfadeed iyo mid maadi intaba, waxaana ay ku xirnaayeen magaalooyinka kale ee baltiga.

XILIGII RUUSHKA

Venäjän vallan aika

Iswidhan iyo Ruushka ayaa waxaa dhexmaray dagaalo marna joogsanaya marna bilaawanaya xiliyadii u dhaxeysay 1527 ilaa 1809, kuwaasoo Ruushka ku qabsaday qaybo badan ee Finland qarnigii 18naad. Udhaxaynta Ruushka iyo Iswidhan baa waxay sababtay in magaalooyinka Turku, Helsinki iyo Viipuri ay gubtaan. Helsinki ayaa la aas aasay 1550 si ay ula tartanto Tallinn (Estonia).

Bilowgii 1800 xukumihii Raashiya Tsar Alexander-I ayaa qabsaday Finland ka dib markii uu awood ku maquunshay boqortooyadii Iswidhan ee markaas Finland xukumaysay, waxayna Finland gabi ahaan ku wareegtay Ruushka sanadii 1809. Finland waxay ku hartay Grand Duchy, Grand Duke uun baa ahaatay Tsar Alexander-I-ka Ruushka. Wuxuu Helsinki ka dhigay caasumadii Finland 1812.

Ruushka ayaa Finland usoo bandigiya qaab layiraahdo karooto iyo ul (carrot and stick). Ruushku wuxuu u ogalaaday Finland inay (Porvoo) caasimadii xiligaas ee Finland ka hirgashaan parlamaan dadku soo doorto oo ay u madaxbanaanyihiin, kaasoo noqday xukun nidaam boqoreedkii (constitutional monarchy) ugu horeeyay ee Yurub laga hirgeliyo.

Qaab heshiiseedkii (carrot and stick) ee Tsar Alexander-I, Ruushka ma aanay bedelin qaabkii ay Finland ku dhisnayd, sida in waxba laga bedalin luqada Iswidish-Finishka ahayd, qaabkii hore ee canshuurqaadida, qaabkii kaniisadii Lutheranka, mida kale Ruushku kagama tagin ciidamo badan Finland. Ujeedada ugu wayn ee Ruushku doonayay ayaa ahayd in uu kasbado rabitaanka shacabka Finishka isla markaana ay Swidhishka iska fogeeyaan waana usuurtagashay Ruushka in mudo ah arinkaasi.

Si kastaba ha ahaatee Tsar Nicholas-II ayaa arinkaas badalay sanadii 1890 kadib markii uu kusoo rogay Finland qaab kaligi talisnimo oo uu ciidamo badan soo duldhigay Finland canshuurtiina ku kordhiyay shacabka Finishka si lowgu taageero ciidamada Ruushka oo markaas dagaalo badan ku furnaayeen sida kii ay la galeen Japanka, arimahaas waxay sababeen inay daganaasho la aan horseedaan isla markaasna ay noqdaan mirihii abuuray

geedka nabada ee Finland ay hada harsato. Kacaankii isbadaloonka ee ka dhacay Rashiya sanadii 1905 iyo dagaalkii Ruushka iyo Jabaanka ayaa keenay in Tsar mowqifkiisii hore ka leexdo. Sanadii 1906 ayaa Tsar wuxuu aqbalay baarlamaan xora (Eduskunta) isla markaana ay noqotay Finland baarlamaankii ugu horeeyay ee ka jira dalalka yurub ee ay dumarku wax dooran karaan. Sikastaba ha ahaatee wali waxaa sii siyaadayay dhaqdhaqaaqii xornimo doonka.

XILIGII XURNIMADA

Itsenäisyyden aika

Intii lagu gudajiray kacankii Ruushka ee 1917, Finland waxay ka faa iidaystay fursadaas waxayna ku dhawaaqday inay tahay wadan xora Disembar 6, 1917, arimo badan oo mashquuliyay aawadeed, , Lenin wuxuu ku dhawaaqay xornimada Finland maalintii ugu dambaysay ee sanadka 1917. Arinkii halkaas kuma istaagin ee waxaa Finland kusoo faafay kacaankii ka jiray Ruushka waxaana hardamay labadii xisbi ee casaanka iyo cadaanka . Casaanka waxaa watay beerofalatada iyo (leftist) ama bidixda, waa dad aaminsan hantida iyo xukunka in si siman wadankoo dhan loo wadaago. Xisbiga cadaanka ayaa waxaa watey dadkii dhulka intiisa badan lahaa iyo ganacsatada.

Sanadii 1918 ayaa xisbigii cadaanka oo uu hogaminayo General Mannerheim talada wadanka la wareegeen, waxaana sanadii 1919 la hirgaliyay sharcigii ugu horeeyay ee Finland lagu dhaqilaha, sharcigaas oo ka dhigay Finland dal republic ah ama wadan leh baarlamaan iyo madaxwayne dadku soo doortaan. Wixii xornimada ka danbeeyay Finland waa ka aaminbaxday Ruushka, inakastoo uu Ruushku ka carooday guuldarada xisbiga Casaanka

ee Finland. Finland waxay qaabaysay in ay heer dhexdhexaad ah ka istaagto siyaasadaha Jarmalka, Midawga-Ruushka, iyo Iswidhan. Bilowgii qarnigii 19-naad ayaa shacab 400,000 gaaraya, oo Finlandays ah ka qaxay Finland, ayagoo nolol ka fiican tay ku jireen raadinaayay, kuwaasoo intooda badan u qaxay dalka Maraykanka. Qaxitaanka loo qaxaayo Maraykanka waxay Finland kala mid ahayd wadamada Yurub oo iyagana qaxaas oo kiae sameenaayay xiligaas

DAGAALKII LABAAD EE ADUUNKA

Toinen maailmansota

Jarmalka iyo Midowgii Sofiyeeti ayaa kala saxiixday heshiis (a nonaggression pact) ah islamarkaana jarmalka iyo Midowga Sofiyeeti ayaa hashiis qarsoodi ah gaaray, kaasoo ah in wadamada Estonia, Latvia, Lithuania iyo Finland ay noqdaan kuwa uu Midowga Sofiyeeti xulufaysankaro. Midawga-Ruushka wuxuu Finland usoo bandhigay heshiiska noocaas ah, balse, Finland way ka diiday.

Diseembar 1939 maalintii xornimada ee Finland loo dabaal dagayey ayaa Ruushku wuxuu dagaal kusoo qaaday Finland, dagaalkaas oo la yiraahdo dagaalkii winterka oo socday mudo 104 casho ah, waana lagaga gacan sareeyay Ruushka in kastoo markii danbe Finland ay gobalo ka mida Ruushka ku wareejisay, balse ay sii wadatay xurnimadeeda iyo madaxbanaanidayda.

1941 ayaa si lama filaana Jarmalku ku galay Ruushka iyadoo Hitler uu ku marmarsiyoonayo in Finland iyo Jarmalka ciidamoodu ay ka wada difaacayaan Ruushka dalka Finland. Finlandaysku way la qabeen Jarmalka in la iska difaaco Ruushka laakiin sida kale iskuma ayan

fiicnayn. Ruushka ayaa marlabaad soo galay Finland markii dagaalku sii dabadheeraaday, Finland iyo Ruushka ayaa wada saxiixday heshiis dagaalka lagu joojinayo 1941, waxaa heshiiska ka mid ahaa in ciidamada Jarmalka ee waqooyiga Finland dagan ay 30 casho uga ba xaan Finland, waxaana ciidamadaa lagu khasbay ayagoo nabdoon inay dalkooda aadaan, waana ay aadeen. Gabagabadii waxa lagu heshiiyay in ay Finland bixiso khasaarihii kasoo gaaray dagaalka Ruushka, waxayna gudaysay kharashaadkaas Finland ilaa iyo 1950.

DHALASHADII NIDAAMKA WAX ISA SIINTA

Hyvinvointivaltion synty

Sanadii 1948 ayaa Finland iyo Midowgii Sofiyeetka waxay kala saxiixdeen heshiis saaxiibtinimo oo ay kimid ahaayeen waxyaalihii ay ku heshiiyeen, iskaashi iyo iscaawinaad waxku ool ah. In aanay Finland u ogalaan wadankeeda ciidamo shisheeye, in aanay Finland ku biirin urarada kasoo horjeeda midawga Sooviyeeti sida (nato), isla markaana aanay aqbalin caawimaad lagu caawiyo ciidamada urarada sida nato. Dhanka Sofiyeetka ayaa ogalaaday in aanu soo hunguriyayn mardanbe dhulka Finland, iyo in aanu Finland kala mid dhigin sida wadamada bariga Yurub. Finland iyo Midawga-Ruushka ayaa waxaa ka dhexeeyay (barter trade) oo ah qaab ganacsi oo alaab la is dhaafsanayo sida Finland oo waraaqo siisa Sofiyeetka halka ay kusoo badalato Saliid ceeriin. Finland ayaa ku biidhay Qaramada midoobay iyo IMF sanaadii 1955.

Intii u dhaxaysay sanadadii 1970 ila 1980 ayaa Finland waxayaadu horumarisay Gross National Product (GNP) oo ah qaab cabiraadeed lagu cabirayo qiimaha waxsoosaarka iyo waxqabad

ee wadanka oo dhan, laakiin (social services) lacagaha dadka masaakiintaa lagu caawinayo iyo hay adaha qaranka oo lacag badan ku baxaysay awgeed ayaa canshuurta wadanku aad u saraysay, taasoo sababtay inay Finland noqoto dalka aduunka ugu qaalisan.

Sanadii 1990 ayaa midowga Soofiyeeti joojiyay hashiiskii alaab kala badalasho ee (barter trade) si uu markaas saliidisa ugu iibsado lacagta adag ee kaashka ah si ay lacagta Sofiyeetka ay u adkaato, arinkaas ayaa Finland kusababay hoos udhac dhaqaale oo aad u baaxadwayn iyo sicir barar, shaqo la'aantii oo aad u korodhay iyo (budget deficits) oo ah bajatka oo yaraada, laakiin marnaba Finland waxba kama badalin qaabkii (welfare program) lacagihii lasiin jiray masaakiinta. Markii uu burburay midowgii soofiyeeti sanadii 1991 Finland waxay joojisay heshiiskii 1948 ee alaabkala badalasho, waxayna raadsatay suuq kale oo dhanka reer galbeedka ah, waxayna xooga saartay kordhinta aqoobteeda xirfadeed.

Nokia ayaa noqotay shirkadaha Tegnoolajiyada aduunka hogaamiya, dawladuna waxay la timid qaab dhaqaale oo aad u sareeya si ay ugu biirto Finland wadamada European Union, sanadii 1995 Finland waxay ka mid noqotay wadamadii ugu horeeyay lacagtii Euroha qaatay.

4 WARBIXIN KU SAABSAN QAAB DHISMEEDKA WAXBARASHADA FINLAND

Yleistietoa Suomen koulutusjärjestelmästä

Finland waxaa aad loo qadariyaa waxbarashada isla markaana baaritaano badan oo la sameeyay ayaa lagu xaqiijiyay inay Finland tahay wadanka aduunka ugu manhaj-iskuul sareeya. Dhamaan bulshada Finishka ayaa dhigata dugsiyada hoose dhexe oo ilaa 9 sano ah, markaas kadibna ayaa qofwalbaa ikhtiyaarki dhowr meelood oo kala duwan midkood waxbarashada kasii wataa, sida dugsi sare, iskuulada xirfadaha, markaa kadibna jaamacadaha iyo machadyo sare oo jaamacadaha u dhigma. Mid kamida sababaha ay Finland ugu guulaysatay isbarbardhiga waxabarashada iskuulaadka ayaa ahayd in Finland ay marwalba sinaayeen islamarkaana ay miisaanaayeen qaab dhismeedka iyo buugaagta waxbarasho ee Finland. Dhamaan iskuulaadka Finland baa lugu dhigaa guud ahaan maadooyin iskumida, oo isku si ay u qaataan shacabkoodhan. Marka wuxu ay iskumeel kasoo wadajeeaan oo iskuna jaan go anyihiin waa fududahay in si fudud loo barto, loona horumariyo.

Hada arinku sidii hore waa ka duwanyahay. Finland waxa hada aad ugu soo haajiraya ajaanib fara badan. Asaasiga waxbarasho ee muhaajiriinta ayaan u dhigmin aasaaska waxbarashadeedka manhaj ee Finland, luqada iyo khibrada oo kala duwan owgeed. Manhajka waxbarasho ee muhaajiriinta ayaan waadax ahayn una shaqayn sida kan qofka Finalnd ku dhashay. Sidaa la ajligeed ayay muhaajiriintu ugu baahanyihiin in laga siiyo waxbarashada caawimaad fara badan. Nasiib

wanaag manhajka waxbarasho ee Finland ayaa ugu deeqa muhaajiriinta wadooyin badan oo waxbarasho.

5 WAXBARASHADA CARUURTA IYO DHALINYARADA

Koulutus lapsille ja nuorille

WAXBARASHO HORDHACA AH

Esiopetus

Dhamaan caruurta lix jirka ah waxay xaq u leeyihiin inay dhigtaan waxbarashada hordhaca ah oo lacag la'aan ah. Waxbarashada hordhaca ah waxay qaadataa sanad, inta aanu caruurta iskuulka bilaabin ka hor. Waxbarashada hordhaca waxaa lagu bartaa dhamaan waxyaalaha u sahli kara caruurta inay la qabsadaan xiliga iskuulka. Ajaanibta qudhooda ayaa dhigan kara waxbarashada hordhaca, waliba iyaga waxaa fursad dheeraad u ah in lasiiyo waxbarashooyin kala duwan oo u gaar ah.

WAXBARASHADA AASAASIGA AH

Perusopetus

Waxbarashada aasaasiga ayaa Finland qaadata mudo 9 sanadood ah. Finland waa qasab in uu qofkasta ee dagan Finland uu soo qaataa waxbarashada aasaasiga ah. Waxbarashada qasabka ah waxay ka bilaabataa marka ilmuhu da'diisu gaarto 7 sano, waxayna qaadataa mudo 10 sano ah marka laga bilaabo xiligaas. Waxabarashada aasaasiga waa bilaash. Ajaanibta xiliga ay dhigtaan waxbarashada aasaasiga ayaa waxaa loogu deeqaa fursado waxbarasho oo

ka dheeraad ah tooda caadiga ah, si looga saacido la qabsashada waxbarashada iyo barashada luqada finishka. Caruurta ajaanibta ayaa qaadan kara waxbarashada isdiyaarinta ah si ay ula jaanqaadaan waxbarashada ku haboon ee Finland.

DUGSI SARE

Lukio

Ardayda kasoo qalan jabisay waxbarashada aasaasigaa ayaa samaynkara dalabka guud ee dugsiga sare. Dugsiga sare wuxuu qaataa 2-4 sano, kadibna ardaygu wuxuu qaadanayaa shahaadada dugsisare. Dugsiyadaha sare waxa lagu dhigtaa lacag la'aan, laakiin buugaagta waa inuu qof walba iibsado. Ardayda asalkoodu yahay ajaanib ayaa hela adeeg waxbarasho gaar ahaaneed oo dheeri ah oo kala duwan iyadoo lala jaanqaadsiiyayo naxwada luqada Finishka.

MACADYADA XIRFADAHA LAGU BARTO

Ammatillinen koulutus

Waxbarashada aasaasiga kadib ayaa wuxuu ardaygucodasankaraaxilligo'aneedalabaadyada la sameeyo, dugsiga sare ama macadyadaha xirfadaha lagu barto (ammattikoulu). Macadyada xirfadaha ayaa qaata mudo 3 sano ah, waxyaalaha la baranayana waxaa kamid ah: waxbarasho xirfadeed, tababar iyo barashada tacliinta guud. Dadka ajaanibta ah ayaa waxbarashada qaab ku haboon loogu qoondeeyaa, tusaale ahaan, luqada finishka ayaa iyaga loo baraa si luqad labaad ah, halka dadka asalkoodu finishka yahay loobaro si luqad koobaad ah. Iskuul xirfadeedku waa lacag la'aan, laakiin qalabka wax lagu baranayo sida buugaagta, waa inuu qofkastaa iibsadaa.

WAXBARASHADA SHAQADA

Oppisopimuskoulutus

waxbarashada shaqada waxaa laga wadaa, waxbarashadii iskuulaadka xirfada lagu baranjiray oo lagadalbanayo in si toos ah waxlooga barto goobaha shaqada iyadoo lashaqaynayo. Wixii waxbarasho shaqadeed laga sameeyay goobta shaqada, waxaa sii dheer iyadoo ardayga lasiinayo xisado dheeraada oo waxbarashada shaqada kusaabsan oo lagu qaadanayo goobaha macadyada xirfadaha.

MACADYADA SARE EE

JAAMACADAHA U DHIGMA

Ammattikorkeakoulut

Macadyadaha sare ayaa lagu bartaa waxbarashada sare, taasoo larabo in qofku xirfad buuxda yeesho. Waxbarashada ayaa sida logu talagalay markii loo qaato qaadata 4 sanadood.

JAAMACADAHA

Yliopistot

Jaamacad waxaa laga wadaa meel lagu barto culuum-iyo waxbarasho maadi ah ee sare. Jaamacada ayaa marka hore waxbarasho sare oo bilaaw ah lagu qaataa, kadibna mid sare. Jaamacadaha ayaa inta badan loo galaa imtixaan, taasoo ay dadna ku guulaystaan kuwana ku guuldaraystaan dhamaan dadka imtixaanka gala. Waxbarashada Jaamacadaha lagu barto ayaa waxaa laga baran karaa Jaamacadaha imtixaan la aanta lagu galo ee la yiraahdo (avoinyliopisto). Jaamacadaha noocan ah ee bilaa imtixaanka lagu galo lagama bixiyo shahaado muctarif ah.

6 WAXBRASHADA DADKA WAA WAYN

Aikuiskoulutus

Maalmahan danbe isbadal badan baa soo wajahay bulshada oo waxbarasha la bartaa inta qofku dhalinyarada yahay ma kaafinayso inta cimrigiisa ka hadhay. Goobaha shaqada ayaa isbadal samaynaya sidaa awgeed ayaa dad badan waxay kui kaliftaa in ay doonaan xirfado kale oo cusub, waana sababtaas in ay Finland kuyaalaan iskuulaad badan oo dadka waayn lowgu talagalay. Waxbarashada dadka waawayn ayaa ah dariiq ku haboon qofka ajnabigaa ee Finland usoo guuray inuu helo xirfad iyo macluumaad iyo aqoonkaloo faa iido

uleh. Qofka wayn waxaa kaloo macquula inuu dhmaysto waxbarashadii markuu yaraa aanu soo dhamaytiran, sida waxbarashada aasaasiga, ama tan jaamacadaha.

Finland wax barashada iskuulada dadka waa wayn waxaa laga bixiyaa ilaa 1000 iskuul. Qaar kamida iskuulaadkaas ayaa baxsha maadooyinka waxbarashada dadka waawayn oo qura. Inta badan waxbarashada dadka waawayn ayaa ka dhacda meel iskuulka ka baxsan, sida goobaha shaqada ama meel kaloo shaqo bixiyuhu qoondeeyay. Waxa labaranayo dhamaantood lama xiriiraan shaqo iyo xirfad aqooneed. waxayaalaha la barto waxay noqonkaraan aqoonguud ama madadaalo.

WAXBARASHADA DADKA WAAWAYN GOOBAHA LAGA BARTO WAXAA KA MIDA

- yliopisto
- ammattikorkeakoulu
- ammatillinen oppilaitos
- ammatillinen aikuiskoulutuskeskus
- valtakunnallinen ja ammatillinen erikoisoppilaitos
- kansalais- ja työväenopisto
- kansanopisto
- kesäyliopisto
- aikuislukio
- opintokeskus
- liikunnan koulutuskeskus
- musiikkioppilaitos

7 FURSADAHA WAXBARASHADA AJAANIBTA

Maahanmuuttajien koulutusmahdollisuudet

Dulucdaan waxaa si kooban lagu soo bandhigayaa dariiqyo waxbarashadeed oo muhiim u ah dadka soogalootiga ah. Khaas ahaan dadka waa wayn ee Finland u soo guuray waxay u baahan yihiin koorsooyin ayaga si gooni ah loogu qaabeeyay iyo waxbarasho luqadeed. Waxaa macquul ah in qofka wayn uu qaadankaro koorisyo luqadeed bilow ah.

Qofka soogalootiga ah, aqoontiisa luqadeed waxaa lagu tijaabiyaa imtixaanada guud ee luqadaha. Si imtixaanadaas qofku u galo waxaa marka hore lasoo qaataa koorisyo xagga luqada ah oo lagu bixiyo iskuulooyin badan.

WAXBARASHADA AAS AASIGAA IYO TAN DUGSIGA SARE SIDII LOO DHIGAN LAHAA ADOO DA'WAYN

Lukio ja peruskoulu aikuisille

Wax barashada aasaasigaa iyo dan dugsiga sareba waxaa laga dhigan karaa iskuulaadka sare ee dadka waawayn, iskuulada shacabka, ama iskulada sare ee caadigaa qaybhooda waxbarashada dadka waawayn. Ardayga ayaa samayn kara dhamaan waxbarashada aasaasigaa, ama qayb ka mida maadooyinka, ama dhibcaha maadoonyinka ama shahadaada oo dhan buu kor u qaadi karaa. Ardaygu wuxuu samaynkaraa waxbarashada dugsiga sare, waxbarashada jaamacadaha, wuxuu qaadan karaa koorsooyin ka mida kuwa dugsiga sare, ama wuxuu kor u qaadikaraa dhibcaha shahaadada dugsiga sare.

Waxbarashadan ayaa loogutalagalay wixii 18 ka wayn. Dugsiga sare ee dadka waa wayn waxbarashada aasaasigaa waxaa lagu dhameeyaa 2-3 sano, iyo dugsiga sare oo lagu dhameeyo 2-4 sano. Iskuulka shacabka (Kansanopisto) waxbarashada aasaasigaa waxaa lagu dhamaynkaraa halsano. Iskuulka ayaa si toosa dalabka looga dhex sameeyaa, si aad arimiha muhiimka u ogaato iyo xiliyada waxbarashada la dalbado. Qalabka waxbarashada iyo wixii wax lagu baranayoo dhan ayaa aytahay in qofwalbaa iski usoo iibsadaa, laakiin waxbarashdu gabi aan waa lacag la'aan.

Wixii akhbaar dheeraada waxaad ka helayaa:

- Iskuulaadka dagmada ama hay-addaha waxbarashada (opetusvirastot)
- Dugsiyada sare ee dadka waa wayn (aikuislukiot)
- Iskuulada sare (etalukio: www.oph.fi/etalukio)

ISKU DIYAARINTA WAXBARASHO XIRFADEEDKA AAS AASIGAA

Ammatilliseen koulutukseen valmistava koulutus

Isku diyaarinta waxbarasho xirfadeedka loogutalagalay ajaanibta oo loo soo gaabsho (MAVA) ayaa qaadata sanad. waxbarashada magaalooinka caasimada ku dhagan laga dhigto ayaa waxaa ka mida iskuulaadka xirfadaha, kuwa adeega, kuwa dhaqaalaha, iyo arimaha bulshada iyo caafimaadka. Waxbarashada ayaa si toosa looga dalbadaa iskuulaadka waxbarashada qabanqaabinay.

Waxbarasho xirfadeedka isdiyaarinta ee loo soo gaabsho (MAVA-koulutuksen) ajaa ujeedadeedu tahay sidii ardayga u helilahaa

aqoon luuqadeed mid dhaqan iyo dhamaan wixii ardaygu ubaahnaa si uu ula qabsado iskuulaadka xirfadaha ee ardaygu hadhaw bilaabay. Cadada waxbarasho ayaa dhan mudo 20-40 wiig oo waxbarasho taasoo barashada luuqada finishka tahay kala bar. Ardada loo qaadanayo waxbarashada isdiyaarinta ayaa laga rabaa in uu luuqada finishka uu horay usoo dhigtay ilaa heerka luuqad aqooneedka 2aad ee layiraahdo (yleisten kielitutkintojen taitotasoa 2). Waxbarashad isdiyaarinta waxaa dhibco dheeriya looga helikaraa waxbarashada aasaasigaa ee iskuul xirfadeedka qofku bilaabo.

Waxbarasho xirfadeedka isdiyaarinta ee loo soo gaabsho (MAVA-koulutuksen) ee ay diyaariyaan magaalooyinka caasimada ku xeeran wixii akhbaar dheeriya xiliyada ay bilaabanayaa iyo goorta la dalbanayo waxaad ka helikartaa boga internetka ee http://www.selmanet.fi/page.asp?_item_id=367.

VIHREÄ SIVISTYS- JA OPINTOKESKUS VISIO

Isutaga ururada cagaaran iyo ururka hoosyimaada ee ViSiO waa xarun waxbarasho oo dadka waawayn, taasoo qabanqaabisa waxbarasho ku saleysan afkaarta cagaaran. ViSiO waxay kaloo qaban qaabisaa siminaaro, koorsooyin la xiriira arimha dabecada, waxay kaloo daabacdaa qalabaad waxbarsheed. ViSiO waxay kaloo qaban qaabisaa koorsooyin iyadoo kaashanaysa jaaliyado kala duwan. Koorsooyinka ay ViSiO bixiso looma diyaarin sida kuwa shahaadooyinka muctarifkaa laga qaato, laakiin waxay kaa caawiyaa in aad naftaada wax u barato si hadhow shaqadii ama waxbarashadii kale kuugu fududaato.

ViSiO waa goob waxbarasho oo umadoo dhan u furan. Caawimaada ayaa waxaa dalbankara dhamaan jaaliyadaha qaban qaabsha waxbarashada ay ViSiO taakulayso.

Waxbarashada ViSiO ay waxku bixiso ayaa noqonkara koorsooyin, siminaaro, safar waxbarashadeed, wax iswaydaarsi, ama fursadooyinka kale ee waxbarashada quseeya. ViSiO waxay wax ku bixisaa labo qaab: Abaabul waxbarashadeed iyo goob aqoon isweydaarsi. Dalabka tabarucida waxaa si toosa looga sameynkaraa internetka, waxqabadka kadibana waxaa waraaqihii wax lagubixiyay oo saxiixan loo dirayaa xafiifka ViSiO. Bixinta tabarucaada waxaa lagu saleynayaa saacadahii wax qabadka. Halkii saac oo waxbarasho waxay u dhigantaa 45 daqiiqo. Ururada waxka soo dalbanaya ViSiO waa iney xisaabaadkooda iyo maamulkooduba yahay mid si sharci ah u habeysan. ViSiO waxay kaalmada bixisaa markii loosoo gudbiyo rasiidyadii iyo waraaqihii wax lagu bixiyay, kadib ViSiO lacagta waxay ku soo shubaysaa akoonka ururka.

Kaalmada waxaa laga dalbanayaa foomka internetka ee boga ViSiO:
abaabul waxbarashadeed:
www.visili.fi/opintotilaisuudet
goob aqoon is weydaarsi:
www.visili.fi/opintokerhot

Hey'adaha bixiya waxbarashada furan ee kobcinta aqoonta waxaa ka mid ah ViSiO, opintokeskukset, kansanopistot, työväenopistot iyo kansalaisopistot. Hey'adahaan kor ku xusan oodhan waxaa si furan looga baran karaa wixii qofku xiiseynayo, qaar badan oo hey'adahaas kamid ahna waxay bixiyaan koorsooyin loogu talagalay ajaanibta.

8 LINKIYO LA XIRIIRA WAXBARASHADA AJAANIIBTA

linkit

Infopankki

www.infopankki.fi

Infopankki waa adeeg ku turjuman luqado kala duwan looguna talagalay inuu war bixin badan oo ku saabsan Filand si sahlan usiiyo ajaaniibta. Warbixintaan waxay ku turjumantahay 15 luqadood.

Selma

www.selma-net.fi

Selma waa adeeg loogu talagalay ajaanibta dagan nawaaxiga caasimada. Adeegaan wuxuu soo koobayaa warbixinta ugumuhiimsan ee waxbarashada ajaanibta ee Helsinki, Espoo, Vantaa, Kauniainen, Tuusula, Kerava ja Järvenpää.

Opetushallitus

www.edu.fi/maahanmuuttajat

Boga internetka ee hey'ada maamulka waxbarashada waxaa laga helikaraa xog badan oo ku saabsan waxbarada loogu talagalay ajaanibta.

www.oph.fi/kielitutkinnot

Boga internetka ee hay'ada maamulka waxbarashada waxaa laga helikaraa qeybaha uu ka koobanyahay imtixaanka luqada. Dhalashada wadankaan helidiisa waxay ku xiran tahay in qofku ku baaso imtixaankaas luqada.


Työministeriö

www.mol.fi/maahanmuutto

Boga internetka ee wasaarada shaqada waxaa lagahelikaaa warbixino kooban oo ku saabsan shaqo-ogolaanshada ajaanibta, shaqoraadinta, waxbarasha la xiriirta shaqada.

QAAB DHISMEEDKA WAXBARASHADA FINLAND

Suomen koulutusjärjestelmä



DA´ / SANADAHA ISKUULKA
ikä / kouluvuodet

EREYBIXIN

Sanastoa

aakkoset	alifbeeto, xuruur	ajaa (parta)	xiirid, sida garka la xiiro
aalto	hir(sida hirka badda), mowjad	ajanvaraus	waqti qabsasho
aaltoliike	dhaqaaq sida hirka ah	ajatella	fakarid
aamiainen	quraac	ajatus	fikir
aamu	subax	ajokortti	kaarka wadista
aattoilta	galabta maalinta ciida ka horeysa	ajoneuvo	gaadiid
ahdas	ciriiri	aktiivinen	firfircoon, aktif ah
ahkerasti	si fir-fircooni ah	ala-aste	dugsi hoose
ahne	iimaan-laawe	alaikäinen	aan qaan-gaar ahayn
aiemmin	hadda ka hor	ale	qiimo-jabin
aihe	mowduuc, xaalada laga hadlo	alennus	qiimo-jabin, raqiisin
aiheuttaa	sababid, keenid	alentua	hoos u dhicid
aika	waqti	alkaa	bilaabid
aika ajoin	mar mar	alkeiskurssi	kooros bilow ah
aikaisemmin	ka hor	alkoholi	alkohool
aikataulu	jadwal	alku	bilow
aikoa	doonid, damcid	alkuperäinen	asala, orijinal
aikuiskoulutus	waxbarashada dadka waaweyn	allekirjoittaa	saxiixid
aina	mar walba	allergia	alerji
aine	walax, shey, maado	aloittaa	bilaabid
ainoa	kaliya	alue	meel, nawaaxi
aito	rasmi ah, asal	aluksi	bilowga
aivan	dhabtii, sax	ammatti	xirfad
ajaa	wadid, sida baabuur wadid	ammattikoulu	iskuul xirfadeed
		ammattilainen	xirfad leh

ampeeri	hal-beega qulqulka korontada	asioida	arin ka yeelasho, wax ka soo qabsasho
ampua	taagasho	askel	tilaabo
ankara	daran, xun, qalafsan	aste	heer, digrii
anoa	codsasho, dalbasho	astia	weel
anomus	codsi, dalab	asu	labis, dharka laga shanayo
ansiotyö	shaqo, shaqo mushaar leh	asua	ku noolaansho
antaa	siin	asunto	guri
antautua	is dhiibid	ateria	cunto
anteeksi	iga raali ahow	atk	kumbuyuutar
apteekki	farmashiye	auki	fulan
apu	kaalmo	aurinko	qorax
apua	i kaalmee, i caawi	aurinkokunta	bah-cadceedeed(qoraxda iyo kowkabyadeeda)
arkipäivä	maalmaha shaqada	autio	banaan, cidlo ah ah
armo	naxariis	auto	baabuur, gaari
arvata	qiyaasid	automaatti	automaatik ah
arvo	qiimo	auttaa	caawin, kaalmeyn
arvokas	qiimo leh	avain	fure
arvostaa	qiimeyn	avaruus	hawo, cir, samo
ase	qori (kan wax lagu dilo)	avata	furid
asema	boos, heer, jago	avioero	furriin (labo is qabtay oo is furay)
asettaa	saarid, habeyn, ku aadin	avioliitto	guur
asia	arin	aviopuoliso	marwo, nin xaas leh
asiakas	macmiil, qofka loo adeegayo	avustaa	kaalmeyn, caawin
asiakirja	dukumiinti		

B, C, D

EREYBIXIN

baari	baar	CD-asema	cd station(qeybta computer-ka ee cd-ga la galiyo)
banaani	moos	cm = senttimetri	sentimiter
benziini	baasiin	dl = desilitra	desiliter
biologia	cilmiga barashada nafleyda	duunari	shaqaale (af-suug)
broileri	digaag la dubo	duuni	shaqo (af suuq)
bussi	bas	dösa	bas (af suuq)
bussiasema	xarunta basaska		

E

edelleen	weli	ei	maya (diidmo)
edes	xataa,	eilen	shalay
edessä	hor	elektoroni	elektroni
edestakaisin	horey-gadaal	eli	yacnii, si kale hadaan u iraaqdo
edistyä	horumarid, hormar sameyn	elintapa	qaab nololeeed
edullinen	qiimo jaban	elintarvike	maciishad, wax lagu noolaado
eduskunta	barlamaan, golaha shacabka	elintaso	heer nololeed
edustaa	wakiil ka ahaansho	elokuu	agoosto
ehdokas	musharrax	elokuva	filim
ehdottaa	soo jeedin (fikir)	eläin	xayawaan
ehkä	laga yaabo	eläke	hawlgab
ehkäistä	ka hortagid	elämä	nolol
ehsiä	ka gaarid	elää	noolaansho
ehto	shardi	enemmistö	inta badan, maajoorati

enemmän	ka badan
energia	enerji, tamar
englanti	ingiliish
ennakoida	sii saadaalin
ennen	ka hor
ennustaa	saadaalin, odorosid
ensimmäinen	ugu horeeya
ensin	marka hore
entinen	hore
epäillä	ka shakin
epäonni	nasiid darro
epäyhtälö	aan ahayn isle'eg
erilainen	ka duwan
erinomainen	aan caadi ahayn, aad u wanaagsan
erityisesti	khaas ahaan
erottaa	ka saarid, shaqo ka iryid

esiintyä	isa soo badhig
esim. = esimerkiksi	tusaale
esine	shey, walax
esitellä	soo bandhigid, isbarid
espanja	isbeyn
estää	celin, ka hortagid
eteen	horey
etelä	koonfur
etenkin	khaas ahaan, waliba
etsiä	raadin
että	in
etu	dan, waxtar
etuhammas	ilkaha hore
EU-maa	wadan ka mid ah EU-da
Euro	lacagta yurub

F, G

faksi	fakis
filmi	filim
firma	shirkad
flunssa	hargab
flunssalääke	daawada hargabka
funktio	fankshan
fuusio	isku darid

fysiikka	fiisigis
g = gramma	garaam
galaksi	ururka xidiga, falag
geometria	jiyoometri, xisaabaadka xariiqaha iyo xaglaha
gramma	garaam
grillata	solid, hilib la solo

haarukka	qaado	hautajaiset	aas, duug
haava	dhaawac	hautausmaa	qabuuro
haave	hammi, damac	he	ayaga
haista	ursasho	hedelmä	miro
hajottaa	burburin, kala ceyrin	heijastus	ileys-noqod, soo noqodka iftiinka
hajuvesi	barafuun	heikko	daciif ah, aan quwad laheyn
hakea	dalbasha, soo qaadasho	heimo	qabiil, koox
hakemus	dalab	heinäkuu	julay
hallinto	maamul	heittää	tuurid
hallita	maamulid	helmikuu	feebaraayo/febrawari
hallitus	dowlad	helpottaa	fududeyn, dhibyareyn
halpa	raqiis	helppo	dhibyar, fudud
haluta	rabid, doonid	hengittää	neefsasho
hame	goono	henki	neef, ruux
hammas	ilig	henkilö	shaqsi, ruux, qof
hankkia	soo qaadasho, keensasho	henkilökohtaisesti	si shaqsiyan ah
hapan	dhanaan ah, suyucid, aashito leh	henkilötodistus	aqoonsi, caddeyn shaqsiyeed
harjoitus	tababar	henkilötunnus	aqoonsiga qofka
harmittaa	ka careysiin, ka xanaajin	herkullinen	macaan, dhadhan wanaagsan leh
harrastaa	xiiseyn, wax qofku ku madadaasho	hermostua	xanaaqid, isku buuqid
harvinainen	naadir ah	herra	mudane, jaale
harvoin	mar-mar dhif ah	herättää	kicin, toosin
hauska	xiiso leh	herätä	kicid, toosid
hauta	qabri	heti	durbadiiba, isla markiiba

hetkinen	wax yar, muddo yar	huolehtia	ka taxadarid
hidas	aayar, tartiib, qunyar	huoli	walwal
hiekkä	ciid	huomata	dareemid
hieno	wanaagsan	huomenna	barri
hiljainen	aamusan, sharqan laheyn	huomio	ogeysiis, war-galin
hiljetä	aamusid	huone	qol
hinta	qiimo	huono	xun, aan fiicneyn
hirveä	wax xun	huuhdella	biyo raacin, dhaqid
hirveä	daran	huume	daroogo
hissi	wiish	huutaa	qeylin
historia	taariikh, sooyaal	hydrostaattinen paine	cadaadiska uu dhaliyo dareeruhu
hitaasti	si tartiib ah	hylly	khaanad
hitsata	alxamid	hymyillä	dhoola-cadeyn
hiukset (hius)	timo	hypätä	boodid
hoikka	dhuudhuuban, caato ah	hyvin	si wanaagsan
hoitaa	xanaaneyn, daaweyn	hyvä	fiican, wanaagsan
hoitaja	xanaaneeye	hyväksyä	aqbalid
hoitolaitos	goobta xanaanda	hyväntuulinen	faraxsan, niyadsan
homma	shaqo, howl	hyödyllinen	faa'iido leh, anfac leh
hotelli	hoteel	hyödyntää	ka fii'iideysi
housut	surweel	häiritä	dhibid, khashkhashaadid
huhtikuu	abriil	häätä	dhib, balaayo
huippu	sare	hävitä	dhummin, lumin, khasaarid
humala	sarkhaansan, khamreysan	hääät	aroos
hunaja	malab	hölmö	doqon
		höyry	uumi

idea	fikir, idea	iltavuoro	kaltan galabtii ah, door galabtii ah
ihaila	ka helid, jeclaansho	imuroida	huufareyn, internetka ka soo koobiyeyn
ihan	iska	inhota	nicid, karaaheysi
ihana	wanaagsan, fiican	innostaa	dhiiragalin
ihastua	ka helid	insinööri	injineer
ihme	cajiib, mucjiso	instrumentti	aalad, qalab
ihminen	qof, ibni-aadan	irrottaa	ka fujin
iho	maqaarka jirka	irtisanoa	shaqo ka eryid
ikkuna	daaqad	iso	weyn
ikä	da'	isoisä	awoowe
ikävä	hilow, wax kaamaqan ood rabtid	isoäiti	ayeeyo
ikävä (mukavan vastakohta)	xun	istua	fariisasho
ilma	hawo	istunto	kal fadhi
ilmainen	bilaash ah, aan lacag ahayn	istuttaa	abuuriid
ilmakehä	hawo, hawada	isä	aabe
ilman	la'aan	itkeä	ooyin, in la ooyo
ilmoittaa	war-galin	itse	naftiisa, nafteeda, qudhiisa, iskiis
ilmoittautua	isdiiwaangalin	itseks	daneyste, anaani
ilmoitus	wargalin	itsemurha	is-dilid
iloinen	faraxsan	itsenäinen	madax-banaan
iloisesti	si farxad leh	itä	bari
ilta	galab		
iltakoulu	dugsi-galbeed		
iltapäivä	galab		

ja	iyo	joukko	koox
jakaa	qaybin	joulu	ciid-masiixi
jaksaa	karib, awoodid	juhla	xaflad, faysto
jalka	lug	juhlia	ciidid, xafladeyn
jano	oon	julkaista	daabacid, soo bandhigid
jarruttaa	joojin, bareeg-qabasho	juna	tareen
jatkaa	wadid, sii wadid	juoda	cabid
jatkuva	socda, oon joogsan	juoksu	orod
jauhaa	burburin, daqiiq-kadhigid	juoma	cabitaan
jo	durbadiiba, isla markiiba, hore	jutella	sheekeysii
johdosta	la xiriirta	juttu	sheeko
johtaa	gudbiye, xariirin(korontada)	juuri	hadda, iminka, xidid
johtaja	hogaamiye	juusto	farmaajo, jiis
johtua	sababid, keenid, dhalin (arin)	jäljennös	koobi
joka	walba, kasta, (qof , arin)	jälkeen	kadib
jokainen	kasta, walba	jälki	raad
joki	webi	jälkiruoka	cunada danbe
joku	qof	jännite	cadaadis koronto
jono	saf, feyl	jännittävä	cabsi leh
jonottaa	saf gelid	jännittää	baqid, ka cabsiin
jos	hadii	järjestys	kala danbeyn, hab, amar
joskus	mar mar	järjestää	habeyn, isku dabaridid
jotakin	wax, walax	järjestö	urur
		järkevä	macquul ah, caqli-gal ah

järvi	war, balli, haro	jättää	ka tagid
jäsen	xubin, qeyb	jää	baraf
jäsenmaa	wadan xubin ah	jäädä	harid, joogid
jäte	qashin	jäätelö	jalaato

K

kaakeli	dhoobo ka sameysan	kana	digaag
kaapeli	keybal	kanava	kanaal
kaappi	armaajo	kannattaa	fiican in la sameeyo
kaasu	gaas	kannattava	faa'iido leh, waxtar leh
kaataa	ridid	kannustaa	ku baraarujin, ku dhiiragalin
kaatua	dhicid	kansa	bulsho, dad
kadota	lumid, mirqid	kansainvälinen	caalami ah
kahvi	qaxwo	kansalainen	muwaadin
kahvila	makhaayad	kansanedustaja	xubin ka mid ah barlamaanka
kaikki	dhamaan	kansi	dabool
kainalo	shoqfal, kililo	kanssa	la jira, iyo
kaivata	rabib, jamasho, hilow	kantaa	qaadid
kaivos	ceel	kapea	ciriiri, ah dhuudhuuban
kala	kaluun	kappale	xabo, (tus: 1 kappale = hal xabo)
kalastaa	kaluumeysi	karensi	ganaax: wax lagu diido
kallis	qaali ah	karjanhoito	xoolo-dhaqasho
kamala	xun, qaab daran		
kamera	kaamiro		

karkottaa	masaafurin, tarxiillid	kehua	faanin, amaanid
kartta	kaarto, maab	keino	qaab, dariiq, si
kasetti	cajal	keittiö	jiko
kastella	fiirsasho	keittää	karin
kasvattaa	korin; sida dadka, geedaha	keksiä	alifid
kasvu	korriin	kello	saacad
katsella	fiirfiirin	keltainen	jaale, huruud
katsoa	fiirin	kelvata	u qalimid
katto	saqaf, ruufka guriga	kemia	kiimiko
katu	jid	kemikaali	walax kiimiko ah
katua	ka shalaayid	kenkä	kab
kauan	fog, dheeg	kerho	naadi, caweys
